



Vänersborg 1 duseembar 2020

## Waa salaaman tahay adiga oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka ardayga dugsi sare ee gaarka ah!

Laga bilaabo toddobaadka soo socda, ilaa fasaxa u ka bilaaban doono markii taariikhda ay ku beegan tahay 18 duseembar, waxay waxbarashada dugsiyada sare ee Isbahaysiga Aqoonta [Kunskapsförbundet], noqon doontaa kuwa musaafad ku salaysan.

Dhacdoonadaan haataan saamayn kuma yeelan doonaan dugsi-dhigashada ubadkaaga. Dugsiyada sare ee gaarka ah [Gymnasiesärskolan] waa iskuullada sida caadada wax loogu barto. Arrinta waxaa sidaas ugu qiimeeyay Hay'adda arrimaha caafimaadka dadwaynaha [Folkhälsomyndigheten], taasoo ku salaysan xaalad-caafimdaadeedka, baahida iyo xaq u yeelashada waxbarashada ubadkinna.

Xilligii dayrta tallaabooyin kala duwan ayaa arrintaan laga qaaday, kuwaasoo ulajeedadooda ahayd in hoos loo dhigo ciriiriga, sida in ardayda u ku cunteeyaan goobahooda. Markii tirada ardayda ay hoos u dhacdo, hab heer sare ayaa goobaha loo adeegsan karaa oona la sii deerayn kara kala fogaanshada.

### Waxaan rabnaa in aan idin xasuusinno hab-raacyada qof kasta ku qasban yahay in uu tixgeliyo

- Gurigaaga iska joog haddii calaamaha cudurka aad dareento, xitaa haddii ay yihiin kuwa fudud. Shaybaar iska qaad.
- Gacmaha iska dhaq.
- Xaji kala fogaanshada!
- Ha adeegsan gaadiidka guud haddii aynan lagamaarmaan ahayn
- Iska ilaali goobaha dadka ay ku badan yihiin

Haddii qof arday ah u isagoo leh calaamadaha hargabka u iskuulka yimaado, ama u xannuunsado isagoo iskuulka ku sugan waa idinla soo xiriiraynaa kaddib waa in u gurigiisa ku laabto. Sidii aan aad hoos ugu dhigno halista cudur-faafinta awgeed waxaa aad muhim u ah tixgelinta nidaamayada arrintaan awgeed hirgaleen.

Haddii qof qoyska ka tirsan la xaqiijiyo in uu cudurka [Covid 19] ku dhacay, waa in ugu yaraan 7 maalmood oo laga soo bilaabo maalinta wargelinta natiijada shaybaarka, dhammaan xubnaha qoyska ay guryahooda iska joogaan, waa xitaa haddii aynan lahayn calaamadaha cudurka, oo tixraacaan darbaaranka Dhakhtarka arrimaha kormeerida cudurrada faafa [Smittskyddsläkare]. Tani waa hab-raac cusub oo berri hore aan khusayn jirin ardayda dugsiyada xannaanadda, dugsiyada biloowga/hoose/dhexe, iskulullada gaarka iyo dugsiyada sare ee gaarka ah, oo laakin laga bilaabo taariikhda maanta xitaa iyaga khuseeya.

Waxaan rajeynayaa in tallaabooyinka aan qaadnay ay kaalin ka geysan doonaan sidii xilliga gu'ga ay arrinta u sahlanaato, waxaan goor dhow u wada noolan doonaa sidii berri hore.

Waxaan doonayna in dhammaan dhallinyarada iyo ilmaha aan ka taageerno tixgelinta nidaamyada hirgaleen, waxaana is-xusuusinaynaa in xitaa xaaladaan ay mar un dhammaan doonto.

♥ U muujinta tixgelinta awgeed xaji kala fogaanshada ♥



Kooxda maamulka iskuullada Isbahaysiga Aqoonta [Kunskapsförbundet]

Wixii su'aallo ah kala xiriir

Maamulaha hawlgalka Camilla Kauffeldt

[camilla.kauffeldt@kunskapsforbundet.se](mailto:camilla.kauffeldt@kunskapsforbundet.se)